# Badqabka Carruurta iyo Qoyska

Waaxda Badqabka Carruurta iyo Qoyska (CFWB) ee cusub waxay isku dari doontaa Adeegyada First 5 iyo Daryeelka Carruurta (CWS), iyo sidoo kale nidaamka daryeelka carruurta iyo agabyada kale ee lagama maarmaanka ah ee loogu talagalay qoysaska, si dib loogu qaabeeyo adeegyada ka hortagga iyo ilaalinta si aan u abuurno iskaashi markaa hab-dhaqankeena soo jireenka ah u jiheynaya ilaalinta carruurta.



## Waa maxay?

Waaxda cusub ee CFWB waxa ay hiigsanaysaa in ay bixiso adeegyada xoojinta iyo ilaalinta qoyska si qoysaska ay wadajir ugu joogaan.

### HIMILOOYINKA

- Ka ilaalinta carruurta iyo dhallinyarada inay galaan nidaamka adeegga daryeelka carruurta iyadoo adeegyada xoojinta qoyska loo bixinayo si dhammaystiran oo isku dhafan.
- Haddii ku lug lahaansho dheeraad ah loo baahdo, CWS wali waxay u joogi doontaa inay bixiso adeegyada ilaalinta carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska si loo xaqiijiyo in daryeelka korinta ay noqoto taageero loogu talagalay qoysaska, ee aanan ahayn taageero lagu bedelayo qoysaska.
- Isku haynta iyo ilaalinta wadajirka qoysaska iyo in qoyska loo aqoonsado inuu ku xeeldheer yahay sida ugu wanaagsan ee loo ilaalin karo badbaadada carruurtooda iyo dhallinyaradooda.
- Yareynta falalka/tallaabooyinka ilaalinta ilmaha ee aan lagama maarmaanka ahayn kuwaas oo taariikh ahaan waxyeelo u geystay isla markaana kala geeyey qoysaska.


## Sideen uga qayb qaadan karaa?

Waxaan si xushmad leh u codsanaynaa fasax si aan u helno/uruurino waxa aad ogtahay/aqoontaada, fikradahaaga, su'aalahaaga, iyo walaacyada aad ka qabto ku biirista doodaheena jira si aanu wax badan uga ogaano qoyskaaga iyo bulshadaada. Iskaan gareey oo kaydi koodka QR si aad u hesho macluumaad dheeraad ah - linkigaan waxa uu sii wadi doonaa bixinta wixii soo cusboonaada hadba inta CFWB la sii wado. Waxaan rajeyneynaa inaan wax kaa barano!




Waxaan rabnaa inaan caawinno qoysaska kahor intaysan dhibaato dhicin. Hadafkayagu waa inaan taageerada xoojin ah siino qoysaska, gacan ka geysano badqabka carruurta, iyo inaan ka hortagno carruurta iyo dhalinyarada inay galaan nidaamka daryeelka carruurta.

WAXAAN RABNAA JAWAAB CELINTAADA




COUNTY OF SAN DIEGO HHSA HEALTH AND HUMAN SERVICES AGENCY | LIVE WELL SAN DIEGO